IIB MA GAIO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Muqdisho 25 Juunyo 1979 L. 4R6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J D S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 Shilin lambar waliba RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya guduheeda -- dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lagagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 24 ee 3 Juunyo 79, heshiiska xagga dhaqanka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hindiya. Bogga 443

LAW N. 24 on 3 Jun 1979, The Cultural Agreement beteen the Somali Democratic Republic and the Republic of India. » 444

SHARCI L. 25 ee 5 Juunyo 1979, Meel-marin Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Qadar. » 445

LAW. N. 25 no 5 Jun 1979, Instrument of Ratification. » 446

SHARCI L. 26 ee 3 Juunyo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa OPEC. » 447

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

LAW N. 26 on 3 Jun 1979, the Loan Agreement Between the Somali D. R. and the OPEC. » 448

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 29 ee 6 Maajo 1979, qaadid dhul dan Guud awgeed oo ay la wareegtay Dawladdu lana siiyey Wakaaladda Madbacadda Qaranka kuna yaal Muqdisho. Degmadda Wardhiigley, kuna fadhiya mq. 57.000/. » 449

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 30 ee 6 Maajo 1979, cad Dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hodan oo loo oggolaaday dhismahiisa Jaalle Cumar Xasan Weheliye. » 450

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 31 ee 6 Maajo 1979, cad Dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hodan, oo loo oggolaaday Dhismihiisa Jaalle Cumar Xasan Weheliye. » 452

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 32 ee 6 Maajo 1979, Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Abuukar Axmed Sheekh Maxamed ku yaal muqdisho Degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 576. » 454

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 33 ee 6 Maajo 1979, cad Dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Wardhiigleey oo loo oggolaaday dhismahiisa Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Xueen. » 456

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 24 ee 3 Juunyo 1979, Heshiiska Xagga dhaqanka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hindiya

**MADAXWEYNAHA**
**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

**MEELMARIN HESHIIS**

ISGAGOO ARKAY : Xaashida laad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska xagga Dhaqanka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hindiya laguna kala saxeexday New Delhi 2dii Abril, 1979. 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 24. 5. 1979.

Qodobka 1aad

Wuxuu oo saarayaa Sharcigan soo socda :
Heshiiska xagga Dhaqanka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hindiya laguna kala saxeexday New Delhi 2dii Abriil, 1979, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelandoonaa JDS astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan gelidoonaa sida waafaqsan qodobkiisa 11aad.

Sahrcigan waxa lagu soo saaridoonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

**Muqdisho 3. .6. 1979**

**MADAXWEYNAHA**

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Law N 24 on 3 Jun 79, The cultural Agreement between the Somali Democratic Rep. and the Republic of India.-

President of the Somali Democratic Republic
INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : The 1st, 2nd and 3rd. Charter of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN : Law n 1, 17, 18 and 19 of 1st July, 1976.

HAVING SEEN : The cultural Agreement between the Somali Democratic Republic and the Republic of India signed at Nw Delhi, on 2nd Apriil, 1979.

TAKING NOTE : Of the approval of the political Bureau and that of Council of Ministers dated 24.5.1979.
Hereby Promulgates the following Law:-

Article I

The Cultural Agreement between the Somali Democratic Republic and th Republic of India signed at New Delhi on 2nd Apriil, 1979, s hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with its Article 11.

This law shall be published in the Official Bulletion of the Somali Democratic Republic.

Mogadisho 3 Jun 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 25 ee 5 Juunyo 1979 Meelmarin Heshiis dhexmaray JDS iyo QATAR.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY. Xaashidii 1aad, 2aad, iyo tan 3aad, ee 21 Oktoobar 1969

ISAGOO ARKAY: Sharciyda kala ah 1, 17, 18 iyo 19 ldii Luulyo 1976,

ISAGOO ARKAY: Axdiga Iskaashiga Warfaafinta ee dhexmaray J. D. S. iyo Dawladda Qadar ee lagu kala saxiixday Dooxa 21kii Diseenber 1978.
ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii Golaha dhexe XHKS. ee 19. 4. 1979.

WUXUU SOO SAARAYAA:
SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska Iskaashiga Warfaafinta ee dhexmay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Qadar.

Qod 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci, wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyadda Dalka Soomaaliyeed.

Qod 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5. .6 1979

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
**Madaxweynaha J.D.S.**

Low N. 25 June 1979

The President of the Somali Democratic Republic

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : Ist, 2nd and 3rd Charters of the 21st Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1, 17, 18, and 19 of Ist July 1976,

HAVING SEEN : The Agreement on Information and Culutrual Co-operation between Somali Democratic Republic and the State of Qadar signed in Doha on 21 December, 1978,

TAKING NOTE : of the Approval of the Central Committee of SSRP. of 19. 4. 1979,
Herby promulgates the following law :

Article 1

The Agreement on Information and Cultural Co-operation between Somali Democratic Republic and State of Qadar signed in Doha on 21 Dec. 1978, is hereby ratified.

Article 2

The above mentioned Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Lay shall come into force immediately after it is signed by the ned by the President of the Somali Republic and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 5. 6. 1979

**MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE**

President of the Somali Democratic Republic

SHARCI L. 26 ee 3 Juunyo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa OPEC

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MEELMARIN HESHIIS

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo SANDUUQA OPEC kuna saabsan Mashruuca Bulaacadaha Xamar laguna kala saxeexday Vienna, Austeria, 28kii Luuliyo 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 10.8.1978.
Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :-

Qodobka 1aad

Hashiiska Amaahda ee dhexmaray JDS iyo SADUUQA OPEC kuna saabsan Mashruuca Bulaacadaha Xamar laguna kala saxeexday Vienna, Austeria, 28kii Luuliyo 1978, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 3.6.1979

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQURAADIGA SOOMAALIYA

SARREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

Law N 26 on 3 Jun 79, The loan Agreement between the Somali Dem. Republic and the OPEC:-

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : The 1st, 2nd 3rd. Charter of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN : Law N 1, 17 18 and 19 of 1st July 1976.

HAVING SEEN : The loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the OPEC SPECIAL FUND for Mogadishu sewerage and storm water drainage project signed at Vienna, Austria, on 28th July, 1978.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers dated 10.8.1978.

Hereby promulgates the following Law :

Article I

The loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the OPEC SPECIAL FUND for Mogadishu sewerage and storm water drainage project signdd at Vienna, Austria, on 28th July, 1978, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the C[illegible]icial Bulletion of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho, 3.6.1979

**PRESIDENT OF**

**THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC**

**MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE**

## QAYBTA LABAAD

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 29 ee 6 Maajo 79, Qaadid Dhul dan guud awgeed oo ay la wareegtay Dawladdu, lana siiyey Wakaaladda M. Qaranka kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiiglay kuna fadhiya mq. 57.000/=

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad tii labaad iyo seddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda lamb. yihiin 17, 18 19 ee 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lam. 41 soona baxay 13kii Setembar 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lam. 6. soona baxday 9 Jennaayo 1967;

ISAGOO ARKAK : Warqadda Lamb. yahay PA/G/4 taariikhdeeduna ahayd 15.12.1973 ee ay sooq qortay WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA oo ku weydiisaneysa in la siiyo dhul laga dhisayo Makhaasiino,

ISAGOO ARKAY : Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Inj. Cabdikariim Cige Guleed iyo Abuuar Maxamed Sheekh ka tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taariikhdeeduna ahayd ee 7 Febraayo 1979;

XEER

Waxaa la caddeynayaa inla siiyey WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA dhul Dawladeed ee cabirkiisu yahay mt 300X190 wuxuuna la mid yahay mq. 57.000/= kuna yaal Muqdisho—Degmada Wardhiigley.-

SOOHDINIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON
Waqooyi waxaa ka xiga : Waddada 21ka Oktoobar.
Koonfur waxaa ka xiga : dhul Dowladeed
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Waddo

Muqdisho, 6 Maajo 1979

K/S Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
W.S. Maxamed Buraale Ismaaciil

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 5
Muqdisho 14 Mag. 1979

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 30 ee 6 Maajo 79 cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hodan, oo loo oggolaaday dhismahiisa Jaalle Cumar Xasan Wehliye.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA

ISAGOO ARKAY : Xaanshada koowaad, tii labaad iyo tii seddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1da Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Seteembar 1973 oo ku saabsan oggolaanaha dhulka dhismaha

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967 oo la Xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday CUMAR XASAN WEHELIYE taariikhdu markay ahayd 21.8.1974, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : Caddaynta dhulka, kuna saabsan cad dhul dowladeed ah, ee uu weydiistay Jaallahaaas ogeysiis ahaana loogu faafiyey Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 99, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga Sahanka iyo Degaanka ee W.H.G. ee Muqdisho fadhigooda 4aad taariikhdeeuuna ahayd 23. 1. 1977;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. 179120 ee 10. 11. 1974, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in CUMAR XASAN WEHELIYE uu bixiyey lacag dhan Sh. So. 428,50/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay, oo ku fadhiya mq. 428,50/= tilmaan cadna laga siiyey CUMAR XASAN WEHELIYE sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 16.11.1974;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii farsamada Sah. Cali Axmed Maxamed kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee WHG taariikhdeeduna ahayd 24.3.79, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Sahanka iyo Degaanka ee Wasaaradda Hawlaha Guud lamb. 99 taariikhdeeduna ahayd 23.1.1977 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu Guriga Waafaqsantahay kuna fadhiya mq. 428,50;

ISAGOO ARKAY: Ogollaanshaha (Nulla Osta) degganaashaha Guriga oo ka dhisan Xamar Degmada, lagana siiyey Xaashida lam. 1947 ee 14.7.1979 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO TIXGELIYEY : In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan sismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera dispenibilità) oo ay ujeedadiisu ahayd dhis, cad dhul Dowladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday CUMAR XASAN WEHELIYE (Dekereeto di libera disponsibilita) Dhulkaasi oo ku fahdhiya 428/50 kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan.

Muqdisho, 6 Maajo 1979

K/S Wasiirka Wasaaradda H. Guud
Maxamed Buraale Ismaaciil

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 9
Muqdsho 14 Maajo 1979,
Hantidhawraha Guud KMG.

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 31 ee 6 Maajo 79, Cad dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Hodan, oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Cumar Xasan Wehliye.

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Xaashada Koowaad, tii labaad iyo tii saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Seteember oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oola xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday Maxaxamed Guudeed Wardheere taariikhdu mrkay ahayd 8. 2. 61 kuna weydiistay dhismo,, cad dhul Dawladeed oo ku yaal (Muqdisho) Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : Caddeynta dhulka kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah, ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaana loogu Faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda lamb 2 R 7 taariikh 15. 7. 1976 iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lam 4171, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodi 3aad taariikhdeeduna ahayd 14 Maarso 1972;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 366 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 4171 laguna aqoonsaday fadhigii 6aad ee Guddiga Waaxda Sahanka iyo Degaanka ee Wasaaradda Hawlaha Guud taariikhdu markay ahayd 15 Abriile 1979, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 252130 ee 21. 6.'76, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in MAXAMED GUULEED WRDHEERE uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 1.150/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, oo ku fadhiya mq. 1.150/=Tilmaan cadna laga siiyey Maxamed Guuleed Wardheere sida ku cad Xaashida ay oortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. (Varbalo di consegna) taariikhdeeduna aheyd 22.6.1976;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qeynuunka siismada dhulka iyo Naqshadda oo timaameysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijntii Farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sah. iyo Degaanka ee W.H.G. taariikhdeeduna aheyd 20.4.1979 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Sahanka iyo Degaanka lam. 366 taariikhdeeduna 19.3.79 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanshaha (Nulla Osta) degganaashada guriga oo ku dhsan Degmada Hodan Jidka Km. 5 laguna siiyey xaashida lam. 257 ee 8.5.78 ee ka soo baxday Dawladda Hoos ee Xamar, Xafiiska Farsamda Dhulka;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lam. 26106 Rep. taariikh. 14.3.78 lagu Diiwaan geliyey Xamar 14.3.78 lam. 67 go'aan II Xirmo 22 oo ah caddeynta N taayada Dr. Muumin Axmed Abuukar taas oo Cali Maxamed Guuleed ka yahay wakiil dhaxaltooyada Aabihiis Maxamed Guuleed Wardheere sida ku cad warqadda sugid dhaxal iyo wakaaladda lam 34/78 ee 19.1.78 wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Cumar Xasan Wehliye, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.150/= kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan Km. 5 .

ISAGOO TIXGELIYEY: In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, cad dhul Dawladeed lagama mrmaan tahay in xuquuqda sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallahaas magaciisa kor ku qoran;

## WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Cumar Xasan Wehliye (Dekereeto di consessione e conseguente libera disponibilità) dhulkaasi oo ku fadhiya mq. 1.150 kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan Km. 5.

Muqdisho 6.5.79

K/S Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
W.S. Maxamed Buraale Ismaaciil

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 6
Hantidhawraha Guud KMG.

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 32 ee 6Maajo '79 Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Abuukar Axmed Sheekh Maxamed ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 576.

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii 1aad tii 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka 21ka Oktooabar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. yihiin 17,18,19 soo baxay 1da luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka sharciga dhulka lam. 41 soona baxay 13kii Setembar 1973

ISAGOO ARKAY: Xeer L. 115 soona baxay 13 Setember 56

ISAGOO ARKAY: Xeer Dawladeed lam. 49 Rep. taariikh. markay aheyd 8 Jannaayo 1963; laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. ee 10 Maarso 1963. taas oo lagu siiyey Jaalle Maxamed Abuukar Xasan cad dhul ah oo ujeedadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 1.118,25/= kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lam. 4865, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha Dawladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 269aad taariikh. duna aheyd 10 Abriil 1961;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lam. 10234 taas oo beddeshay middii hore lambarkeedu ahaa 4865 laguna aqoonsaday fadhigii 2aad ee Guddiga Dhismaha Dawladda Hoose ee Xamar, taariikh. markey aheyd 13.5.1976, kuna saabsaneyd dhismo guri kuna fadhiya mq. 576;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda dhismaha iyo dhulka, taariikhdeeduna aheyd 18.4.77 taas oo caddeneysa in Naqshadda dhisamaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Xamar lam. 10234 taariikh. 13.5.1976, laguna xaqiijiyey sda ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta (Nulla Osta) degganaashada guriga ku dhisan Degmada Wardhiigley laguna siiyey Naqshida lam. 9549 ee 14 Agoosto 63 taas oo caddeyneysa in Naqshadda iyo guriga is waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lam. 756 Rep. taariikh. 29.11.1967 lagu diiwaan geliyey Xamar 3.12.1967 al n.864 Atti Pubblici Vol.18 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo MAXAMED ABUUKAR XASAN oo u ah wakiil Cabdiraxmaan Maxamed Abuukar Xasan, wuxuuna ka gaday kuna wareejyey IMAAN AADEN CALI wax allaale wixii xuquuq ah cad dhul dhismihiisii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq: 1.118,25=/ kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lam. 1042 Rep. taariikh. 5.5.1968 lagu Diiwaan geliyey Xamar 6.5.1968 al n. 350 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Dr. Xasan Warsame Cali taas oo IMAAN AADEN CALI ka gaday kuna wareejiyey AXMED MAXAMUUD SIYAAD iyo MAXAMED ROOBLE CAMEY wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihiisii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.118,25=/ kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lam. 8555 Rep. taariikh. 15.12.1976 lagu Diiwaan geliyey Xamar 19.12.1976 al n.357 Atti Pubblici Vol. 21 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Muuse Xuseen Saadiq, taas oo XAAJI MAXAMUUD ROOBLE CAMEY iyo AXMED MAXAMUUD SIYAAD, oo ay ka joogto Jaalle Xaliima Maxamed Axmed ku dhalatay Xamar 1944, degan Xamar ahna Soomaali, shaqadeeduna tahay Shaqaale Wakiilna ka ah sida ku cad Wakaaladda lam. 34/76 ee 27.11.1976, waxey ka gadeen kuna wareejiyeen Jaalle ABUUKAR AXMED SHEEKH MAXAMED wax allaale wiixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihiisii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 576 kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley;

ISAGOO AQOONSAN In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaala cadka dhulka oo Dawladda (Libera Diponibilità) oo ay ujeedadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa

**XEER**

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey lana aqoonsday J/le Abuukar Axmed Sheekh Maxamed, dhul ku fadhiya mq. 576/= kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiiglay.

Muqdisho, 6 Maajo 1979.

K/S Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
W.S. Maxamed Buraale Ismaaciil

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lam. 10
Hantidhawraha Guud KMG.
W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 33 ee 6 Maajo 79 cad dhul Dawladeed oo ku yaal Oegmada Wardhiigley oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Dr. MAXAMED YUUSUF XUSEEN.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA

ISAGOO ARKAY: Xaashida koowaad, tii labaad iyo tii seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. yihiin 17,18,19 ee 1 Luulyo 1976, oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbga Hantiwadaagga Ka caanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 41 soona baxay 13 Setembar 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismahiisa;

ISAGOO ARKAY: Xeer lam. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Arjigii codsiga ahaa uu keensaday XASAN MAXAMED WEHLIYE taariikhdu markay aheyd 25.4.1968 kuna weydiistay dhismo,cad dhul Dawladeed oo ku yaal (Muqdisho) Degmada Wardhiigley;

ISAGOO AQOONSAN: Caddeynta Dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah, oo uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaana loogu Faafiyey Dawladda, Hoose ee Xamar laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lam. yahay 5870, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga Dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho fadhigoodii 24aad taariikhdeeduna aheyd 29 Oktoobar 1968;

ISAGOO ARAKY: Naqshadda lam. 2343 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 5870 laguna aqoonsaday fadhigii 5aad ee Gudidga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho taariikhduna markey aheyd 9.9.1976, kuna saabsaneyd dhismo guri kuna fadhiya mq. 1050

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lam. yahay 132278 ee 21 .7.1969, kana soo baxday xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddkana soo baxday xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo cad-

mq. 1.050/= tilmaan candna laga siiyey XASAN MAXAMED WEHLIYE sida ku cad xaashida ay qoratay Waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. taariikhdeeduna aheyd 11.10.1969;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, oo ku fadhiya

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sah. iyo Degaanka Mag. dhulka, taariikhdeeduna aheyd 27.2.1979 taas oo caddeyneysa in Naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Dawladda Hoose lam. 2343 taariikhdeeduna aheyd 27.5.1976 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq. 1050;

ISAGOO ARKAY: oggoaanshaha (Nulla Osta) deganaashada gurga ku dhisan Xamar Degmad Wardhiigley laguna saxiixay xaashida lam. 714/79 ee 28 Jennaayo 1979 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska) Farsamada dhulka

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lam. 2854 Rep. taariikh. 15 Agoosto 1971 lam. 767 Atti Pubblici Vol.20 oo ah caddeynta Notaayaha Dr. Muuse Xuseen Saadiq taas oo XUSEEN MAXAMED WEHLIYE ka gaday kuna wareejiyey Dr. Maxamed Yuusuf Xuseen wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaalay cadka dhulka ah ku fadhiya mq. 1050/=kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley;

ISAGOO TIXGELIYEY: In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladeed (Concessione e conseguente libena disponibilità) oo ay ujeedadiisu aheyd dhis, cad dhul Dawladeed lagama marmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

## WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey loona aqoonsaday Dr. MAXAMED YUUSUF XUSEEN in uu dhisto (Dekereeto di concessione e conseguente libera disponsibilità) dhul kaasi oo ku fadhiya mq. 1050/= kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley

Muqdisho 6 Maajo 1979

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lam. 1 bogga lam. 7
Muqdisho 14.5.79
Hantidhawraha Guud KMG.
Yuusuf Cali Nuur

K/S Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
W.S. Maxamed Buraale Ismaaciil

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoron;
HADDU HUBSADAY: in Buugga Keydka dhumay lambarkiisu ahaa 5147/4 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga

iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad kuna qornayd lacag dhan Shs. So. 20.273,00 uu iska lahaa Jaamac Muuse Abookar sida ku cad warqadda lam. taariikh oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY

in la baabiyo (ammartameento) Buugga dhigashada), lam 514/4 qoran magac Jaamac Muusee Abookar ayna ku jirto sh.so.20.273

WUXUU FASAXAY

In Bankga Ganacsiga iyo kaydka Laatanta 3aad u beddelo (jeegga Buugga keydka), ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah, maalinta go,aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqardiga Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 5 6.79

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
W.S. (Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)